



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA MAALIYADDA

Wejiga Sadexaad ee Mashruuca Kharashka Joogtada ah iyo Dib u Habeynta Maaliyadeed (RCRF III)

Qaab-dhismeedka Maaraynta Bii'ada/Deegaanka iyo Bulshada (ESMF)

Horudhac

Qaab-dhismeedka Maaraynta Bii'ada/Deegaanka iyo Bulshada, waa mid hubinaya in hawlaha Mashruucu ay waafaqsan yihiin Qaab-dhismeedka Bii'ada/Deegaanka iyo Bulshada ee Bangiga Adduunka iyo Heerarka Tayo iyo Deegaan ee Bangiga Adduunka. Ujeedooyinka Qaab-dhismeedka Maaraynta Bii'ada Deegaanka iyo Bulshada, ayaa ah in la dejiyo mabaa'diida, xeerarka iyo tilmaamaha iyo waliba hab-raacyada si loo qiimeeyo saameynta deegaan iyo bulsho iyo si loo horumariyo tallaabooyin ka hortag ah, loona fuliyo hab la socosho oo lagu xaqiijinayo in dhinacyada bii'ada/deegaanka iyo bulshada in sidii loo baahnaa loo tixgaliyay.

Horumarinta Qaab-dhismeedka Maaraynta Bii'ada/Deegaanka iyo Bulshada, waxay ku timid la tashiyo ka dhexeeya Wasaaradda Maaliyadda/Waaxda Fulinta Mashaariicda iyo sidoo kale daneeyayaal heer qaran oo muhiim ah, heer Dawlad Goboleed iyo heer bulsho ee dalka Soomaaliya iyo sidoo kale Khubarada Bangiga Adduunka ee ku howlan dhinacyada Bii'ada/Deegaanka, Bulshada iyo Tacaddiyada ku-salaysan Jinsiga.

Ujeedka Qaab-dhismeedka Maaraynta Bii'ada/Deegaanka iyo Bulshada waa in uu bixiyo habraacyada baarista bii'ada/deegaanka iyo bulshada, taasoo u ogolaanaysa Hay'adaha u xilsaaran fulinta Mashaariic-hoosaadyada in ay bidhaamiyaan, qiimeeyaan, oo ay yareeyaan saamaynta bii'adeed/deegaanka iyo bulsho ee hawlhooda. Qaab-dhismeedku waxaa kale oo uu qeexayaa habraacyada hay'adaha ee la maraayo inta lagu jiro hirgelinta barnaamijyada, oo ay ku jiraan kuwa la xiriira kobcinta awoodda.

Waxay ka kooban tahay tallaabooyinka iyo qorshayaal ay tahay in laga hortago iyo in la yareeyo halka ka hortag uusan suurtagal aheyn, iyo/ama laga hortago khataraha iyo saameynta xun. Qaab-dhismeedka Maaraynta Bii'ada/Deegaanka iyo Bulshada, wuxuu iftiiminayaa awaamiirta iyo shuruudaha bulsho iyo bii'o/deegaan ee ugu macquulsan ee lagu dabbaqi karo iyo sida shuruudahaas loogu fulin doono habraacyada baarista, qiimaynta, ansixinta, yaraynta, la socodka iyo weliba ka warbixinta khataraha bulshada iyo bii'ada/deegaanka iyo saameynta la xiriirta hawlaha mashruuca.

Qaab-dhismeedka Maaraynta Bii'ada/Deegaanka iyo Bulshada, wuxuu hagi doonaa maaraynta mashruuca dhinacyada bii'ada/deegaanka iyo bulshada inta lagu jiro hirgelinta, gaar ahaan aqoonsiga saameynta mashruuca ee suurtagalka ah iyo tallaabooyinka yareynta khataraha mashruuca.

Khatarta la fili karo ee Mashruuca:

Khataraha bulsho ee la fili karo ee hoos ku xusan waxay ku soo baxeen la tashiyo isdaba joog ah oo lala yeeshay qaybaha kala duwan ee daneeyayaasha, oo ay ku jiraan shaqaalaha dowladda, shaqaalaha caafimaadka, bulshada rayidka ah iyo shaqaalaha ururada aan dowliga ahayn.

Sinnaanta iyo ka qayb galka:

-Go'aannada shaqaaleysiinta ee isku keenaya dhammaan qaybaha shaqo ee shaqaalaha (kuwa tooska ah iyo kuwa aan tooska ahayn), waxaa laga yaabaa in aysan ka tarjumeynin habraac hufan, oo cadaalad ah, iyadoo beddelkeedana ay saameeyso eex qabiil ama malo-awaal ku saabsan haweenka sida; in aysan haweenku bixin karin adeegyada qaarkood ama aan la isku haleyn karin haddii aan la qabin. Qabiilada laga tirada badan yahay iyo kooxaha iyo barakacayaasha, ayaa si gaar ah halis ugu jira in la takooro.

- Qaar ka mid ah shaqaalaha la qoray ee caafimaadka iyo waxbarashada ee u shaqeeya dadka aanay gaarin adeegyada, ayaa laga yaabaa in ay ku guuldareystaan in ay bixiyaan adeegyo ayagoon la takoorin.

-Qorshaha lagu xiriirinayo taageerada dugsiyada ee shuruudaha shaqo wanaagga ee lala xiriiriyay buundooyinka imtaxaanka ama cabbirrada kale ee tayada. Waxaa laga yaabaa in la

takooro bulshooyinka saboolka ah ee ardaydu aanay heli karin adeegyada wax baridda ama habab kale oo lagu wanaajiyo natiijada waxbarashadooda.

Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada :

-Shaqaalaha waxaa si toos ah u beegsan kara dadka rabshoolayaasha ah ee aan dowladda ku jirin balse, adeegsan kara ama ka faa'iidaysan kara xiriirka ay la leeyihiin dowladda. Tani waxay khatar gaar ah ku tahay dadka ka shaqeeya meelaha ka baxsan goobaha ay dowladdu maamusho iyo goobaha dadku isugu yimaadaan sida; xarumaha caafimaadka iyo dugsiyada iyo kulamada bulshada.

- Qaab-dhismeedka jireed ee ay shaqaaluhu ku qabtaan adeegyada bulshada, waxaa laga yaabaa in aanay u adeegin dheddigga ama waxay la kulmi karaan khataro dabiici ah ama kuwo ay dadku sameeyeen taas oo iyana saameyn karta Caafimaadka iyo Badbaada Shaqaalaha.

- Shaqaalaha Caafimaadka ee Dumarka ah, waxay khatar ugu jiri karaan in ay qaadaan cudurrada faafa sababtuna waa iyadoo aysan jirin qalabka la isaga ilaaliyo khataraha cudurada iyo waliba iyadoo aysan jirin tababarkii loo baahnaa.

- Shaqaalaha Caafimaadka Dumarka ah, waxaa la siin doonaa agabka aasaasiga ah ee caafimaadka, kuwaas oo ku haboon goobaha uu ka dhalan karo caabuqa ee shaqaalaha ka shaqeeya daryeelka caafimaadka ama bulshada.

Walaaca gaarka ah, ayaa laga qabaa maareynta haraadiga qashinka loo isticmaalay caabuqa (oo ay ku jiraan waxyaabaha dadka muda oo leh afka fiiq-fiiqan) iyadoo aysan jirin agab ku filan oo la isku ilaaliyo, dhinaca kale keydinta qalabka la isticmaalay ee wax mudi kara ee lagu rido qalab laga yaabo in ay kasoo dhex dusaan, gaar ahaan maadaama aysan Soomaaliya lahayn adeegii ku habboonaa oo ah maareynta wasakhda ee goobaha caafimaadka, wacyigelin iyo xeerar.

Xadgudubka Ka Faa'iidaysiga Jinsiga iyo/ama Dhibaateynta :

- Shaqaalaha dumarka ah (ha ahaadaan, shaqaale dawladeed, ama haweenka ka shaqeeya caafimaadka ama macallimiin), waxay la kulmi karaan xad-gudubka ka faa'iidaysiga Jinsiga ama dhibaateynta kale marka lagu gudo jiro habka shaqaalaysiinta ama sii-heynta ee ragga u sahlay in ay noqdaan kuwo ku xooggan maamulka shaqaalaysiinta badi xafiisyada dowladda haddii aysan ahayn dhammaan.

- Shaqaalaha Caafimaadka ee Dumarka ah inta badan, waxay guryaha u safraan kaligood iyagoo lugeynaya. Natiijada arrintaasi ka dhalateyna waa in ay soo wajahdo khatar gaar ah oo la xiriirta tacaddiyada ku-salaysan Jinsiga.

- Iyadoo aysan jirin siyaasado isku dhafan, oo bixiya jawi lagu bad-baadi karo, oo xor ka ah xad-gudubka ka faa'iidaydiga Jinsiga ama dhibaateynta.

- Tiro yaraanta tababarrada loogu tala galay shaqaalaha muhiimka ah (caafimaadka iyo waxbarashada) ee bixiya adeegyada dadka loo gaystay tacaddiyada ka dhanka ah jinsiga iyo macluumaad la'aanta ku saabsan cidda bixineysa adeegga iyo cidda la siinayo, iyo iyadoon la ilaalin siraha dadka cabashada soo gudbiya, waxay dhammaan arrimahan kordhin karaan waxyeellada, rabshadaha iyo dhimashada.

- Fahamka yar ee laga heysto hababka bad-baadada ee mudnaanta siinaya dadka tacaddiga loo geystay iyo xoojinta xallinta khilaafaadka bulshada ee xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa in ay waxyeelo u geystaan haweenka iyo gabdhaha, dhibaatooyinkaas, oo ay ku jiraan waxyeelayn, ceebayn iyo in si khasab ah loogu guuriyo danbiilihii dhibka u gaystay.

- Iyadoo uu jiro cudurka safmarka ee COVID 19, Haweenka ka shaqeeya safka hore sida caafimaadka, waxaa laga yaabaa in ay la kulmaan xadgudubyo ay ka mid yihiin rabshadaha lammaane ee guriga iyo noocyada kale ee xadgudubka inta ay ku dhex jiraan bulshada.

Arrimaha kale ee Jinsiga Quseeya :

– Iyadoo siyaasadda rasmiga ah ee dowladdu ay tahay in haweenka shaqaalaha ah loo ogolaado in ay qaataan fasaxa umusha si ay u helaan fasax ay fursad ugu helaan in ay ilmahooda nuujiyaan, haddana haweenku, waxay u nugul yihiin in ay waayaan shaqooyinkooda, uurka kadib maaddaama xaqiiqdii siyaasadahan si dhif ah loogu hoggaansamo ama si dhab ah loo hirgeliyo.

– La'aanta matalaadda haweenka ee maamulka dugsiyada, waxay keeni kartaa xaddidaad awoodda bulshada ee kordhinta tirada macallimiinta haweenka ah, waxayna taasi qayb muhiim ah ka cayaartaa inay gabdhuhu heli waayaan jawi ay soo dhoweyn ku dareemaan.

Shaxda hoose waxay tilmaamaysaa tallaabooyinka lagu yareyn karo khataraha waaweyn ee bulsho iyo bii'o/deegaan ee lagu sheegay wada tashiyadii hore ee daneeyayaasha.

Shaxda-2-aad - Qaabka Yareynta Khataraha

| Khataraha Bulsho | Istraatijiyadda Yaranta/Maaraynta | Sidee arintan loola soconayaa? | Yaa masuul ka ah? |
|---|--|--|--|
| Khataraha bulsho ee lama filaanka ah | La socodka khataraha bulsho ee aan la filayn iyo xoojinta tallaabooyinka lagu yareynayo khataraha ee khubarada arrimaha bulshada | Waxaa loo marayaa hababka la socodka iyo cabashooyinka iyo hababka jawaab celinta bulshada | Wasaaradda Maaliyadda/ Waaxda fulinta mashaariicda |
| Dhaqamada shaqaaleysiinta ee ku salaysan takoorka | Shaqaalaha mashruuca ee ay ku jiraan shaqaalaha tooska ah iyo kuwa qandaraasleyda ah, waxaa looga baahan yahay in ay hababka shaqaalaysiinta ka dhigaan kuwo hubinaya dhaqan ku saleysan hufnaan iyo dhex dhexaadnimo | <p>Cabasho walba, oo la xiriirta dhinaca shaqaalaysiinta ee Shaqaalaha tooska ah iyo kuwa qandaraasleyda, waxaa lagula macaamilayaa habka ama dariiqa cabashada shaqaalaha ee mashruuca.</p> <p>Shaqaalaha qandaraaska heysta, wixii cabasho ah ee la xiriira shaqaaleysiintooda/qoritaanka waxa loo gudbin doonaa madaxa mashruuca.</p> | Wasaaradda Maaliyadda/ Waaxda fulinta mashaariicda iyo qandaraaslyaa sha |
| Sinnaan la'aanta adeegyada bulshooyinka | Wasaaradda caafimaadka iyo waxbarashada, oo la shaqaynaya waaxyaha ka hawlgala qeybaha caafimaadka iyo waxbarashada, waxay isticmaali doonaan xogta si loo hubiyo in meelaha u baahan ay awood u yeeshaan in ay helaan adeegyo iyo in habka xulashada uu yahay mid hufan oo miisaaman. | <p>Qorshaha Howlgelinta Daneeyayaasha, wuxuu xaqiijin doonaa wadatashiyada joogtada ah ee bulshada ee waxqabadka mashruuca.</p> <p>Madaxa guud ee Mashruuca, wuxuu u oggolaanayaa soo gudbinta cabashooyinka muwaadiniinta ee la xiriira waxqabadka mashruuca iyo xulashada degaanka.</p> | Wasaaradda Maaliyadda/ Khubarada bulshada |

| | | | |
|--|---|---|--|
| <p>Dhiirigelinta in Umuliso Dhaqameedyada aan loo arkin Haween ka shaqeeya Caafimaadka waxay dhiirigelinaysaa in hooyooyinku aadaan goobaha lagu dhalo</p> | <p>Haweenka ka shaqeeya Caafimaadka, agaasimayaan umuliso dhaqameedyada si ay u horumariyaan ka faa'iidaysiga daryeelka dhalamada, goobta dhalmada, daryeelka dhalmada kadib, adeegyada kala dheereynta dhalmada. Umuliso dhaqameedyada, waxaa loo xulan karaa Haweenka Ka shaqeeya Caafimaadka.</p> | <p>Jawaab celinta bulshada iyo hababka la socodka mashruuca</p> | <p>Wasaaradda Caafimaadka</p> |
| <p>Shaqada iyo faa'iidada ay helaan dadka tunka wayn ama magaca leh</p> | <p>Xulashada Shaqaalaha Caafimaadka Dumarka ah, waxaa samaynaya bulshada, waxaana lagu samaynayaa meel furan, si hufnaan ku jirto, sidoo kale wacyigelinta, waxaa loo adeegsan doonaa adeegyada loogu talo galay, laakiin Shaqaalaha Caafimaadka Dumarka ah, waxay u shaqaynayaan dhammaan bulshada, oo ay ku jiraan kooxaha nugul iyo kuwa la takooro. Sidoo kale shaqooyinka Shaqaalaha Caafimaadka ee Dumarka ah, waxaa lagu soo dhajinayaa xaafadaha ama deegaannada baahida ka jirto ee ay ku jiraan meelaha ay joogaan kooxaha nugul iyo kuwa la takooro, waxaana lagu darayaa shaqooyinkaa dadka nugul iyo kuwa la takooro.</p> <p>Xulashada iskuullada ee ku salaysan shuruudaha wax qabadkooda, waxaa laga yaabaa in ay takooraan ama dhinac u</p> | <p>Jawaab celinta bulshada iyo hababka la socodka mashruuca ee ay ku jiraan kooxaha nugul iyo kuwa la hayb sooco.</p> | <p>Wasaaradda Caafimaadka/ Wasaaradda Waxbarashada</p> |

| | | | |
|---|--|---|--|
| | riixaan bulshada tabarta daran ee aysan ardaydu helin adeegii waxbarasho ama hababkii kale ee ay sare ugu qaadayeen natijada waxbarashooda. | | |
| Fursadda kawada qeybgalka muwadininta iyo madal ka qeybgal, oo aan jirin | Ka-qaybgalka Muwaadinku, waxaa uu hubin doonaa ka mid noqoshada iyo in la gaaro kooxaha nugul iyo kuwa la takooro. | Qorshayaasha ka-qaybgalka muwaadiniinta si dhow, ayaa dib loogu eegi doonaa si loo hubiyo dhammaan tallaabooyinka la qaaday si kor loogu qaado ka-qeybgalka kooxaha nugul iyo kuwa la takooro. | Wasaaradda Maaliyadda/ Khubarada bulshada |
| Khatarta amniga ee shaqaalaha iyo isticmaalayaasha adeegyada waxbarashada iyo caafimaadka | <p>Waaxda Fulinta Mashaariicdu, waxay horumarin doontaa hab-raacyada amniga iyo hab-maamuuska shaqaalaha mashruuca iyo shaqaalaha rayidka ah, kuwaasoo loo daabici doono dhammaan shaqaalaha rayidka ah ee uu mashruuca maalgeliyo iyo sidoo kale shaqaalaha mashruuca.</p> <p>Dhammaan shaqaalaha waxaa la ogeysiin doonaa hab-maamuuska iyo u hoggaansanaanta, waxaana lagu horumarin doonaa xeerka anshaxa.</p> <p>Shaqaalaha mashruuca, waxaa lagu tababari doonaa hab-raacyada iyo hab-maamuuska amniga si joogto ah.</p> | <p>Qorshaha Howlgelinta Daneeyayaasha, wuxuu hubin doonaa wadatashiyo bulsho oo joogto ah, kaasoo sare u qaadi doona jawaab celinta ku aaddan walaacyada dhanka ammaanka ah, waxaa sidoo kale sare loo qaadayaa bixinta adeegyada amniga.</p> <p>Waxaa taa weheliya, Habka ama Nidaamka Cabashooyinka ee mashruuca, wuxuu u ogolaan doonaa muwaadintiinta in ay soo gudbiyaan dacwooyinka la xiriiira amniga.</p> <p>Waxaa ku jiri doona Buugga/tusaha Hawlaha Mashruuca ee barnaamijka deeqaha iskuulka, waxaana la socon doona Wasaaradda</p> | Wasaaradda Maaliyadda/ Waaxda Fulinta Mashaariicda, iyo Dowladda Federalka Soomaaliya iyo khubarada bulsho ee Dowladda Xubinta ka ah Dowladda Federaalka |

| | | | |
|--|---|--|--|
| | <p>Dugsiyada qaarkood, waxay shaqaaleysiin karaan ilaalo meelaha ammaankoodu xun yahay ama marka ay bartilmaameed yihiin, oo la beegsanayo. Hagidda, tabobarrada iyo hab-dhaqanka, ayaa diyaar noqon doona si loogu hoggaansamo qoraalka hagidda ee Bangiga Adduunka ee ku aaddan adeegsiga shaqaalaha amniga.</p> <p>Qandaraaslayaasha, waxaa looga baahan doonaa in ay ku daraan habraacyada amniga si loo ilaaliyo shaqaalaha dukumeenti-yadooda tartanka, oo ay uga warbixiyaan dhacdooyinka halista ah sida ku cad nidaamka. Warbixinta Dhacdooyinka Bii'ada/Deegaanka iyo Bulshada. Dedaal dabagal sax ah, ayaa la sameyn doonaa ka hor abaal-marinada.</p> <p>Wasaaradda Maaliyadda/Waaxda Fulinta Mashaariicda, ayaa la soconaya, waxna ka qabanaya khatraha ku wajahan shaqaalaha mashruuca.</p> | <p>Maaliyadda iyo Wasaaradda Waxbarashada.</p> <p>Nidaamyada amniga qandaraaslayaasha waxaa lagu dari doonaa warbixinadooda waxaana la socon doona qofka ilaalinaya qandaraaskooda, oo uu la socdo sarkaalka ilaalinta bulshada.</p> | <p>Wasaaradda Maaliyadda/Wasaaradda Waxabrashada</p> |
|--|---|--|--|

| | | | |
|---|---|---|---|
| <p>Xadgudubka Ka Faa'iideysiga Jinsiga iyo/ama Dhibaataaynta/ Tacaddiga Ku-salaysan Jinsiga</p> | <p>Iyadoo laga duulayo Qorshe Hawleedka Tacaddiyada Ku-salaysan Jinsiga, Mashruucu, wuxua sameyn doonaa:</p> <p>1) In ay caddeeyaan hawlaha shaqo ee lagu yareynayo khataraha Xadgudubka Ka Faa'iidaysiga Galmada iyo/ama Dhibaataaynta/ Tacaddiga Ku-salaysan Jinsiga ee shaqaalaha dhexdooda, bukaannada, ardayda iyo xubnaha bulshada,</p> <p>2) in ay fuliyaan kor u qaadidda tayada iyo tababarida dadka ay khusayso, oo ay ku jiraan shaqaalaha mashruuca iyo dadka la shaqeeya dowladda ee Xadgudubka Ka Faa'iidaysiga Galmada iyo/ama Dhibaataaynta/ Tacaddiga Ku-salaysan Jinsiga; Mashruucu, waxaa kale oo uu qaban doonaa howlo la tashi iyo baraarujin loo sameynayo bulshada oo ku aaddan khataraha Xadgudubka Ka Faa'iidaysiga Galmada iyo/ama Dhibaataaynta/ Tacaddiga Ku-salaysan Jinsiga</p> <p>3) In ay sameeyaan Habka Wax ka qabashada Cabashooyinka, oo wax ku-ool ah oo leh wadooyin gaar ah si loo maareeyo cabashooyinka la xiriira Rabshadaha ku salaysan Jinsiga si loo suurtageliyo ka warbixinta dhacdooyinka</p> | <p>Qorshaha Hawl-gelinta Daneeyayaasha, wuxuu xaqiijinayaa wacyigelin bulsho oo joogto ah oo ku saabsan mawduucyada ay ka mid yihiin Xadgudubka Ka Faa'iidaysiga Galmada iyo/ama Dhibaataaynta/ Tacaddiga Ku-salaysan Jinsiga.</p> <p>Hababka Cabashooyinka Mashruuca, wuxuu caddeyn doonaa dariiqooyin muuqda ah, si ay u sahasho una ogolaato nidaam cabasho soo gudbin oo hufan, sir ah, isla markaana mudnaan siiya qofka dhibaataadu gaartay, gaar ahaan xilliyada la soo gudbinayo cabashooyinka la xiriira dhinacyada Xadgudubka Ka Faa'iidaysiga Galmada iyo/ama Dhibaataaynta/ Tacaddiga Ku-salaysan Jinsiga.</p> <p>Lataliye-yaasha Tacaddiyada Ku-salaysan Jinsiga, waxay bixin doonaan warbixinno saddex-biloodle-yaal ah oo ku saabsan fulinta qorshe hawleedka Tacaddiyada Ku-salaysan Jinsiga.</p> | <p>Wasaaradda Maaliyadda /Waaxda Fulinta Mashaariicda/ Lataliyaha Tacaddiyada Ku-salaysan Jinsiga (GBV) iyo khubarada bulshada ee heer Dawlad Goboleed.</p> |
|---|---|---|---|

| | | | |
|--|---|--|--|
| | <p>Rabshadaha ku salaysan Jinsiga si badbaado leh, oo sir ah isla markaana u danaynaya qofka lagula kacay danbiga jinsiga la xiriira.</p> | | |
|--|---|--|--|

Habka wax ka Qabashada Cabashooyinka:

Wasaaradda Maaliyadda, ayaa mas’uul ka noqon doonta in ay la socoto xalinta dhammaan arrimaha la xiriira howlaha mashruuca, iyadoo la raacayo shuruucda u degsan Dowladda Federaalka Somaaliya iyo Bangiga Adduunka ee heer deegaan iyo bulsho iyadoo loo marayo Habka Cabashada oo si cad loo qeexay, oo iftiimineysa habraaceeda la heli karo, diyaarna u ah dhammaan daneeyayaasha.

Meelaha ay soo gaaraan dhammaan cabashooyinka, waxaa ku sugnaan doona khabirada Badbaadada Bulshada ee heerarka Dawlad Federaal iyo Heer Dawladaha Xubnaha ah Dowladda Federaalka, kuwaasoo ku heli doona cabashooyinka taleefoon, qoraal ama iimaylka (Email), khadadka taleefanka gacanta iyo ciwaannada iimaylka ee labada heer Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka.

Khubarada ilaalinta bulshada, ayaa xaqiijin doona, gelin doona, gudbin doona, dabageli doona xallinta cabashada, oo natijada u sheegi doona qofka cabanaya. Qofka cabanaya, wuxuu xaq u leeyahay in aan magaciisa la sheegin, sidaas awgeed magaca iyo dadka lala xiriirayo lama qori doono, waxaana la hubin doonaa ilaalinta caddaymaha ee cabashooyinka loo soo jeediyo si daacad ah.

Cabashooyinka la xiriira mashruuca guud, waxaa wax ka qaban doona Wasaaradda Maaliyadda/Waaxda Fulinta Mashaariicda ee heer Federaal iyo heer Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah, si kastaba ha ahaatee kuwa ku saabsan bixinta adeegga caafimaadka ama waxbarashada, waxaa lagu xallin doonaa iyadoo lala kaashanayo wasaaradda ay khuseyso ee Dowladda Federaalka ah iyo/ama Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka. Khabiirka sare ee arrimaha bulshada ee Dowladda Federaalka, ayaa fulin doona tababarka dhammaan shaqaalaha Waaxda Fulinta Mashaariicda iyo Wasaaradda Caafimaadka iyo goobaha waxbarashada ee ku aaddan helitaanka cabashooyinka iyo gudbinta iyo maareynta cabashooyinka iyo warbixinnada.

Guddiga xallinta cabashooyinka, oo ah heer Federaal iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka, ayaa la dhisi doonaa, waxaana guddoominaya maareeyaha mashruuca, shaqaalaha Waaxda Fulinta Mashaariicda ee ay khuseyso, ayaa lagu dari doonaa hadba sida loogu baahdo, iyadoo ku xiran cabashada (wax soo iibsiga, maaliyadda, lataliyaha Lasocodka iyo Qiimaynta, Rabshadaha ku salaysan Jinsiga iyo isgaarsiinta), iyo sidoo kale shaqaale ka socda Wasaaradaha Caafimaadka iyo Waxbarashada, oo lagu martiqaadi doonaa hadba sidii loogu baahdo.

Saraakiisha Badbaadada Bulshada, ayaa daadihin doona shirarka, waxayna daba gal ku samayn doonaan habka xalinta cabashooyinka. Guddiga xallinta Cabashooyinku, wuxuu kulmi doonaa bil kasta si ay dib ugu eegaan cabashooyinka yaryar, horumarka laga gaaray xallinta cabashooyinka, dib u eegista horumarinta iyo waxtarka habka cabashada, iyo hubinta in dhammaan shaqaalaha iyo bulshadu ay ka warqabaan nidaamka iyo mashruuca.

Kulamo deg-deg ah, ayaa la qaban doonaa haddii ay dhacdo in cabashooyin waawayn loo gudbiyo Wasaaradda Maaliyadda/Waaxda Fulinta Mashaariicda. Cabashooyinka muhiimka ah, ayaa lagu qeexi doonaa buug-gacmeedka Hababka Cabashooyinka. Cabashooyinka aadka u daran ama kuwa sii daran ee ku lug leh waxyeelada dadka ama deegaanka ama kuwa khatar ku keeni kara sumcadda mashruuca, khabiirka arrimaha bulshada ee heer Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka, waa in ay si degdeg ah ay u ogeysiyaan khabiirka arrimaha bulshada ee Dowladda Federaalka ama Madaxa Waaxda Fulinta Mashaariicda, kaasoo ku wargalin doona Bangiga Adduunka 72 saacadood gudahood. sida ku cad shuruudaha Warbixinta Dhacdooyinka Deegaanka iyo Bulshada.

Dhacdo halis ah, waa midda sababta ama laga yaabo in ay waxyeelo weyn u geysato bii'ada/deegaanka, shaqaalaha, bulshada, ama kheyraadka dabiiciga ah ama dhaqanka, kharashkeeduna badan yahay, waxaa adag in dib loo celiyo, waxayna keeni kartaa ilaa heer waxyeelo ama dhaawac waara; ama ku guul dareysiga fulinta tallaabooyinka Bii'ada/Deegaanka iyo Bulshada ee leh saameyn weyn ama u hoggaansanaan la'aanta soo noqnoqota ee

siyaasadaha deegaan iyo bulsho; ama ku guuldareysiga in la xaliyo Tilmaamaha u hogaansanaan la'aanta taasoo laga yaabo in ay keento saameyn weyn.

Cabashooyinka la xiriira Tacaddiyada Ku-saleysan Jinsiga:

Si looga hortago halista dhaleeceynta iyo uga sii daridda dhaawaca maskaxeed/maskaxda iyo aargoosiga suurtagalka ah, Habka Cabashada , waa in uu lahaadaa wadiiqooyin iyo hab-maamuusyo, si uu awood buuxda u siiyo hab qarsoodi ah, oo xasaasi ah oo ku saabsan kiisaska la xiriira Tacaddiyada Ku-saleysan Jinsiga.

Haweenka iyo gabdhaha iyo ciddii kale ee ka tirsan kooxaha halista ku jira, ayaan inta badan fursad u helin macluumaadka iyo adeegyada la heli karo. Waxay sidoo kale aad ugu dhowdahay in ay helaan macluumaad aan sax ahayn, iyadoo ay ugu wacan tahay qaababka awoodda ee la iska qabatimay ee aan awoodda loo sinnayn iyo/ama fursadaha si xun uga faa'iidaydiga dadka oo jira.

Ololaha macluumaadka raadiyaha iyo habab kale oo isgaarsiineed, ayaa la isticmaali doonaa, waxaana ku jiri doona macluumaadka ku saabsan adeegyada jawaabta ku saabsan Tacaddiyada Ku-saleysan Jinsiga (hababkaas waxaa ka mid ah lambarada wicitaanka deg degga ah, iyo meelaha adeegyada laga raadsado).

Mashruucu, wuxuu tilmaami doonaa waddooyin cad cad, oo warbixinada lagu soo tabiyo, sidoo kalena la horumariyo agabka lagula socdo cabashooyinka la xiriira Tacaddiyada Ku-saleysan Jinsiga /ama Dhibaataaynta iyo sidoo kale habraacyada soo tabinta warbixinnada iyo jawaab celin la sameeyo waqtiga ku habboon, iyadoo ay ku xiran tahay, culayska eedaynta.

Hababka wax ka qabashada cabashooyinka ee Tacaddiyada Ku-saleysan Jinsiga/ /ama Dhibaataaynta waa:

- In uu noqdo mid muhiimad siiya qofka dhibaataadu gaartay/badbaadaha - kaasoo hubiya in jawaabta dhacdada ay tahay mid waafaqsan badbaadada, ixtiraamka, sirta iyo takoor la'aanta badbaadaha.
- In uu noqdo mid Xoojiya deg-degsiimaha iyo waxtarka jawaabta (haddii ay dhacdo dhacdadan oo kale) iyadoo loo marayo nidaam si fiican u shaqeynaya iyo tallaabooyinka hagaajinta si loo suurtageliyo daryeelka dadka dhibaataadu soo gaartay/badbaadaha iyo anshaxa ee badbaadayaasha.

Kormeerka iyo ka Warbixinta:

Kormeerka iyo soo tabinta warbixinada:

Waaxda Fulinta Mashaariicda, waxay la socon doontaa fulinta mashruuca si ay u qiimeeyso horumarka laga gaaray tilmaamayaasha lagu qeexay dukumeentiyada shaqada ee mashruuca iyo qaabka natiijooyinka, sida waxqabadka Bii'ada/Deegaanka iyo Bulshada iyo shaqada Habka Xallinta Cabashooyinka; qanacsanaanta ka-faa'iideystayaasha; shaqo abuurka; iyo habab shaqaynaya, oo wax lagu hagaajinayo.

Waxaa la hirgelin doonaa Tilmaamayaasha la socodka bii'ada/deegaanka iyo bulshada sidoo kale Waaxda Fulinta Mashaariicda, waxay soo gudbin doontaa warbixinnada ku saabsan horumarka la gaaro saddexdii biloodba mar ama sida kale uu u codsado Bangiga Adduunka xaalad kasta.

Dib ugu soo warbixinta daneeyayaasha:

Tabobarrada daneeyayaasha oo joogtada ah, waxay awood u siin doonaan jawaab-celinta horumarka mashruuca iyo horumarinta dhammaan daneeyayaasha. Intaa waxaa dheer, qaybta 4-aad ee Mashruuca Kharashka Joogtada ah iyo Dib u habeynta Maaliyadeed in ay taageerto naqshadaynta iyo isticmaalka qalabka si loo horumariyo daah-furnaanta iyo abuurista hababka jawaab celinta muwaadiniinta ilaa heerka xarumaha (goobaha la doortay).

Waxa kale oo ay taageertaa barashada iyo qiimaynta qalabka ugu saameynta badan ee suurtoogalka ah. Qayb-hoosaadka 4.3 ee qiimaynta saameynta ku leh jawaab celinta muwaadinka ee waxbarashada iyo caafimaadka, waxay ku dadaali doontaa in lagu daro ra'yi-celinta muwaadinka bixinta waxbarashada iyo/ama adeegyada caafimaadka gaar ahaan shaqaalaha uu taageeray mashruuca iyo qiimeynta saameynta suurtoogalka ah ee waxqabadyadu ku yeelan karaan helitaanka caafimaadka iyo waxbarashada iyo tayada.

Waxaa la maalgelin doonaa Qiimeyn adag, oo ku saabsan saameynta si loo qiimeeyo waxtarka ka-qeybgalka muwaadiniinta ee helitaanka waxbarashada/caafimaadka iyo tayada kooxaha caafimaadka/waxbarashada.